

WAX KULA AKHRINTA ILMAHAAGA GURIGA



Education
Public Schools

FIKRADO LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA LEH CARRUURTA YAR YAR

READING WITH YOUR CHILD AT HOME – IDEAS FOR PARENTS OF YOUNG CHILDREN

Akhrisku waa muhiim

READING IS IMPORTANT

- Akhrisku wuxuu had iyo jeer ahaa xirfad muhiim ah, aduunkeenan casriga ah aad iyo aad ayuu uga muhiimsan yahay sidii hore.
- Carruurta waxay bartaan muhimada akhriska isla marka ay arkaan xubnaha qoyska oo maalin kasta u isticmaala wax akhrinta iyo qorista ujeedooyinkooda.
- Wax kula akhrinta ilmahaaga guriga waxay ka caawineysaa dhammaan goobaha barashada ee dugsiga oo dhan.
- Carruurta waxay kugu arkaan adoo nolol maalmeedka dhexdeeda waxna akhrinaya waxna qoraya- wax u akhrinta madadaalo darteed, la qaybsiga sheeko ilmahaaga, isticmaalida cunto diyaarin, sameynta liiska waxyaalaha la soo gadayo, qorida kaarka dhalashada qofka loogu diro, ama akhrinta calaamadaha waddada. Tani waxay bareysaa in akhrinta iyo qoristu ay yihiin xirfado muhiim ah aduunka maanta.
- Badanaa waxaa dugsigu waalidiinta soo weydiiyaa inay dhageystaan marka ilmahoodu guriga wax ku akhrinayo. Waa hab wanaagsan oo lagu taageero akhriska ilmahaaga. Waxaa laga soo qaataa buuggaagta maktabada dugsiga ama maktabada xaafadaada.
- Ahow mid ku kalsoon in ilmahaagu uu baran doono wax akhriska.

Waxaad ku sameyn karto guriga si aad u caawiso

WHAT YOU CAN DO AT HOME TO HELP

- Adiga uun ahow. Ka qayb geli carruurta wada sheekeysi maalin kasta.
- Kow wax ugu akhri carruurta. Waxay ka caawineysaa inay bartaan afka buugaagta waxayna ku dhiiri gelineysaa inay ka helaan buugaagta iyo akhriska.
- Ka hadal buugaagta, wada akhriya kana dhiga wax akhrinta mid lagu raaxeysto, waxqabad la wadaago.

- Waa inaad hubisaa in waxyaalo fara badan oo uu akhriyo in guriga ay u yaaliin ilmahaaga, waxyaalo khiyaali ah iyo kuwa dhab ahba.
- Waa muhiim inaad ilmahaaga wax ugu akhriso afka aad guriga kaga hadashaan haddii uusan Ingiriisku ahayn afkaagii koowaad. Khibradi waxay sheegaysaa in isticmaalka afka gurigu ay ka caawin doonto ilmahaaga barashada akhriska Ingiriiska.
- Isku day inaan telefshinku soo dhexgelin wakhtiga akhriska. U samee wakhti gaar ah oo wax akhris ilmagaaga, oo ka fog waxyaalaha jeedinaya.
- Dhageyso ilmahaaga maalin kasta, xitaa wakhti gaaban.
- U sii buugaag sidii heshiis ama hadiyad oo kale

Talooyin ah dhageysiga ilmahaaga oo wax akhrinaya

HINTS FOR LISTENING TO YOUR CHILD READ

- Inta aan wax la akhrin ka hor, ka hadal buuga dushiisa, ciwaanka, sawirada kalana hadal waxa buuga laga yaabo inuu ku saabsanaado.
- Inta akhrisku socdo, kawada hadla wixii aad soo akhriscen ilaa mecsha aad mareysaan, qiyaasana waxa dhici dooma marka ku xigta.
- Inta wax la akhrinayo, hadal oo su'aalo weydii ku saabsan sheekada iyo sawirada.
- Marka aad wada akhrineysaan buug adag, qofba mar ha akhriyo. Wax akhriyayaasha bilowga ahi waxay akhrin karaan qaybaha lagu soo celceliyo kuwa khibrada lehna waxay akhrin karaan bog ama hal qormo hadal ah.
- Marka aad heshaan eray aan la aqoon:

Hako si aad u siiso ilmahaaga wakhti uu ku garto erayga.

Islamarkiiba

- Dib ugu noqo bilowga weedha hadalka ah, ama dhaaf erayga adag ilaa dhammaadka weedha.
- Ka raadi wax fikrad ah sawirka ama erayada
- Fiiri xarafka ugu horeeya kana feker waxay noqon karaan erayadu
- Weydii “Tani wax micne ah ma sameysaa?”
- Isku dey inaad ereyga ku dhawaaqdo
- Haddii ay lagama maarmaan noqoto u sheeg ilmahaaga ereyga

Ku amaan ilmahaaga isku deyga xitaa haddii uu khaladaad sameeyo.

Wixii la akhrin lahaa ama la sameyn lahaa

WHAT TO READ AND DO

- U sheeg oo ku celi sheekooyinka nooc kasta leh oo ay ku jiraan sheekooyinka ay ka helaan, sheekooyinka khiyaaliga ah, aflaamta, waxyaalaha wargeyska xaafadaada ku qoran iyo taariikhda qoyska.
- La ciyaar ciyaaro sida “waxaan soo saarida...wax ka bilaabanaya d”.
- Weydii ilmahaaga inuu akhriyo cunto diyaarin sahlan oo qoraal ah marka aad wax wada karinaysaan
- Akhri waxyaalaha qosolka leh, joornaalada, sheekooyinka gaagaaban, gabayada iyo heesaha, oo ay ku jiraan heesahan carruurta ee xannaanada carruurta loo qaado.
- Wada akhriya wargeyska
- Wada samee hal xiraalayaasha erayada & iyo xujooyinka kale ee erayada.
- Akhri tusaha TV –ga inta aydaan daawan barnaamij
- Wada fiiriya waraaqaha sanduuqa boosta
- Akhri jihooyinka iyo calaamadaha marka aad gaari wadataan ama wax gadanaysaan
- Akhri waxna u qor iyo waraaqaba xubnaha qoyska
- Wada ciyaara cayaaraha sabuurada xeerarkana akhriya
- Sii xarfo balaastig ah, qalimaanta midabka, qalin qori, qalin biire iyo waraaqo wax lagu qoro.

Xasuusana...

AND DO REMEMBER ...

- Kawada hadla micnaha sheekooyinka iyo erayada.
- Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu akhriyo meel kasta wakhti kasta.
- Hakugu arko ilmahaagu adigoo ka helaya wax akhriska
- Booqo isticmaalna maktabada kuu dhow. Ka soo qaado buugag adiga nafsadaadu ilmahaagana uga soo qaad.
- Kala hadal macalinka ilmahaaga ama maamulaha wixii talo iyo caawimo dheeraad ah
- Ku raaxeyso wax akhriska - wuxuu noqonayaa wax lagu raaxeysto.

La xiriir dugsiga ilmahaaga kana raadso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sidii aad uga caawin lahayd inu ilmahaagu wax akhriyo.